

Wadada loo maro horumarinta tallaalka COVID-19

Tallaalka COVID-19 wa la sameeyay, waxaana ku mahadsan 15ka sano ee cilmi baarista lagu sameeyay faayraska corona. Kadib daraasado badan ee lagu sameeyey xayawaano iyo bini aadam ah kadib waxay muujiyeen in tallaalku shaqeyay oo amaan yahay, waxaa loo ogolaaday in la isticmaalo.

Daraasadaha bani'aadamku waxay ku dhacaan MARXALADO si loo hubiyo in tallaallada ay ammaan yihiin.



HORUMARKA TALLAALKA

- Samaynta tallaalku wuxuu ka bilaabmaa shaybaarka
- Waxaa marka hore lagu tijaabiyaa xoolaha.
- Haddii ay nabdoon tahay xayawaanka, markaa dadka ayaan ku tijaabin karnaa



Tijaabiin cilmi ee marxalada 1

- Amniga ayaa ugu muhiimsan
 - Waxaa lagu tijaabiyey koox yar oo mutadawiciin ah
 - Waa maxay qiyaasta saxda ah ee la isticmaalayo? (Qiyaasta)
 - Miyuu tallaalku sameeyaa wax aannaan doonayn inuu sameeyo?
 - (Dhibaatooyinka ay keento)
- Haddii aysan jirin waxyeellooyin daran, waxaan aadi karnaa marxalada 2



Tijaabiin cilmi ee marxalada 2

- Waxaa lagu tijaabiyey 100 + mutadawiciin ah
 - Immisa tallaalka ayaa amnigeenna sugaya?
- Waa maxay dhibaatooyinka soo raaca ee aan aragnay illaa hadda?



Tijaabiin cilmi ee marxalada 3

Waxaa lagu tijaabiyay 1000s oo mutadawiciin ah.

- Dadka qaar ayaa qaata tallaalka dhabta ah
- Dadka qaarkiis waxay qaataan tallaalka iskayeel ah (Placebo)
- Waxaan isbarbar dhigeynaa labadan koox si aan u hubino in tallaalku yahay mid amaan ah oo shaqeynaya



DIB U EEGIDDA FDA

Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka (FDA)

FDA waxay hubisaa in tijaabooyinka bukaan socod eegtada ay ahaayeen kuwo amni ah oo loo sameeyay si sax ah sida sharciga qabo FDA waxay eegtaa natiijooyinka tijaabooyinka waxayna hubisaa in tallaalka uu badbaado yahay iyo inuu shaqeynayo

Tallaalka la Ansixiyay

Saynisyahannada FDA iyo dhakhaatiirta waxay eegaan dhammaan macluumaadka. Haddii ay go'aansadaan in tallaalku shaqeynayo oo si badbaado leh loo sameyn karo, markaa FDA waxay u oggolaaneysaa tallaalka qof walba inuu qato.



Ma Ogtahay?

1

Talaalada ayaa shaqeynaya!
Waxay la shaqeeyaan difaaca jirka ee dabiiciga ah si ay kaaga caawiyaan in aad kaa badbaado cudurka

2

Tallaallada qaarkood waxay isticmaalaan fayraasyo nool ama dhiintay. Tallaalka COVID-19 ma isticmaalo fayraska-kaliya wuxuu isticmaalaa qaybta jeermiska ee ka dhigaaya jirkeenna garashada iyo la dagaallanka fayraska.

3

Qaadashada tallaalka 'COVID-19' ayaa kaa badbaadin doonta mustaqbal ahaan cudurka 'COVID'. Marka 75% bulshadeenu helaan tallaalka, faafitaanka fayrasku wu joogsan doonaa.

4

Waxaad ka heli kartaa Macluumaad ku saabsan COVID-19 Daraasado ka soocda Jaamacadda Buffalo Halkan: [Research.buffalo.edu/portal/clinicaltrial/](https://research.buffalo.edu/portal/clinicaltrial/)

Xog ka socota www.cdc.gov/vaccines

Su'aalaha la Weydiiyo Caafimaad Bixiyahaagaa ama Farmasiilahaaga



Waxaa kuu keenay shabakada codadka bukaanka

Waa maxay waxyeelooyinka tallaalkan?

Immisa jeer ayaan u baahanahay inaan qaato tallaalkan?

Tallaalkan muxu ka kooban yahaay?

Xagee ka heli karaa talaal?

Waa maxay khataraha haddii aanan rabin inaan qaato tallaalka?

Qaadashada tallaalku ma waxay ka dhigeysaa mid ammaan kuu ah inaad ka ag dhowaato dadka qaba COVID

**Machadka Sayniska Caafimaadka iyo Tarjumaadda
Xarunta cilmi-baarista bukaan socodka iyo tarjumaadda**

875 Ellicott Street Buffalo, NY 14203 (716)-888-4850 ctsi@buffalo.edu

Barnaamijkan waxaa taageera Xarunta Qaranka ee Hormarinta Cilmiga Tarjumaadda Machadyada Qaranka Caafimaadka ee hoos yimaada lambar abaalmarinta UL1TR001412 Jaamacadda Buffalo. Mawduucu waa masuuliyadda keliya qorayaasha mana aha inuu matalayo aragtida rasmiga ah ee Machadyada Qaranka ee Caafimaadka.